

oo Koobidda Qorshaha Qeybinta GURIGA – ARP (Draafti)

(Summary of the HOME – ARP Allocation Plan) (Draft)

Magaalada Boston waxay heshay **\$21.6 malyan** oo ah maalgelinta Brograamka Iskaashiga Maalgelinta GURIGA – Qorshaha Badbaadinta Mareykanka (HOME Investment Partnership Program – American Rescue Plan) HOME – ARP) oo lagu talagalay in lagu kordhiyo dagganaashada guriyeynta ee lagu taageero shakhsiyaadka, reeraha, ama dadyowga guri laaweyaasha ama ku jira halista guri la'aanta.

Waa in la isticmaalo maaliyadda GURIGA-ARP (HOME-ARP) ugu dambayn Sateembar 2030, waxaana loo isticmaali karaa guryaha kirada ee la awoodi karo, kaalmada kirada ee ku saleysan-dagganaha, adeegyada taageerada, iyo in lagu iibsado ama lagu horumariyo hooyga aan lagu badneen. Waxaa la isticmaali karaa ilaa boqolkiiba 15 xagga maamulka iyo qorsheynta. Iyo, ilaa boqolkiiba 5 deeqda waxaa loo isticmaali karaa kharashka ku baxa hawlaha iyo dhismaha awoodda ururada aan fa'iidada doonin sida kuwa bixiya guri la'aanta.

Maaliyadda HOME-ARP waxaa loo isticmaalaa si wax loogu taro dadyowga xaqa u yeesha (Qualifying Populations) (QPs):

1. guri laawaha,
2. kuwa ku jira halista in ay lumiyaan guri la'aanta,
3. kuwa ka carara, ama iskudaya in ay ka cararaan dagaalka guriga, dagaalka shukaansiga, weerarka jinsiga, dabagalka, ama xambaarka aadanaha.
4. kuwa ka tirsan dadyow kale halkaas oo bixinta adeegyada taageerada ama kaalmada ka hor istaagto guri la'aanta qoyska ama u adeegi doonto kuwa ku jira halista dagganaasho la'aanta; ama
5. ciidamada ama qoysaska kana mid ah xubinta qoyska Ciidamada.

Sharuudo dhamaystiran oo la xariira brograamka HOME-ARP waxaa laga heli karaa [Isdhaafisga HUD \(HUD Exchange\)](#).

oo Koobidda Qorshaha Qeybinta GURIGA – ARP (Draafti)

(Summary of the HOME – ARP Allocation Plan) (Draft)

MOH waxay qabatay shirar iyo kooxo xoogga saara si loo fahmo baahida ay iminka qabaan dadyowga xaqa u yeesha maalgelinta HOME-ARP; gaar ahaan, kuwa la kulmay guri la'aanta ama ku jira halista guri la'aanta.

Sida ku saleysan wada tashiyadaas iyo xogta cilmi barista, baahida badan ay degdeg u qabaan Dadyowga Xaqa u Yeesha ee Boston, waa guryo ammaan ah, la awoodo, lana socodsiiin karo, oo gaar ahaan loogu talogalo 3,945 oo daggan Boston, kuwasoo aan qabin meel lagu tilmaamo hooy.

Intaas kaddib, boqolkiiba 30 reeraha kireesteyasha Boston waxaa aad ugu culus kharashka guriyeynta, iyadoo in ka badan boqolkiiba 50 dakhligooda ku bixiya kiro, halkaas ay ka jiraan liisas dhaadheer oo lagu sugo guryaha dadweynaha iyo guryaha la kabo. Wadahadal lala yeeshay ururada u adeega Dadyowga Xaqa u Yeesha (Qualified Populations) waxaa lagu codsaday in maaliyadda HOME-ARP sidoo kale lagu taageero raadinta guryaha iyo adeegyada lagu taageero dadka si ay u helaan maaliyad iyo in ay ku sii jiraan guryaha. Bacdamaa ay jirto baahidaas, Xafiiska Guriyeynta Duqa Magaalada (Mayor's Office of Housing) (MOH) wuxuu soo jeediyay in uu boqolkiiba 74 deeqda maaliyadda meel loo dhigo kiro la awoodo, si taageero joogto ah loo siiyo guriyeynta; boqolkiiba 14 deeqda maaliyadda meel loo dhigo adeegyada lagu taageero boqolkiiba 12 loogu talogalo dhismaha awoodda aan fa'iido raadinin iyo kharashka maamulka MOH eek u baxa maamulka iyo qorsheynta.

Miisaaniyadda HOME-ARP ee la soo Jeediyay (Proposed HOME-ARP Budget) (Agoosto 2022)			
Halaha la Ogot Yahay	Xisaabta Maaliyadda	% Deeqda	Heerarka Adeegga
Adeegyada Taageerada	\$3,000,000	13.9%	La xisaabi doono
La Wareegidda iyo Horumarinta Hooyga aan Lagu Badanin	\$0	0%	Laguma Dabaqi Doono
Kaalmada Kirada Ku Saleysan Dagganaha (TBRA)	\$7,000,000	32.4%	La xisaabi doono

oo Koobidda Qorshaha Qeybinta GURIGA – ARP (Draafti)

(Summary of the HOME – ARP Allocation Plan) (Draft)

Horumarinta Guryaha Kirada la Awoodo	\$9,000,000	41.7%	200 Guryo Cusub
Hawlaha aan Fa'iido Raadinin	\$0	0%	Laguma Dabaqi Karo
Dhismaha Awooda aan Fa'iidada Raadinin	\$1,000,000	4.6%	
Maamulka iyo Qorsheynta	\$ 1,597,797	7.4%	
Iskudarka Qeybta HOME ARP	\$ 21,597,797		

Draaftiga Qorshaha HOME-ARP waxaa la soo dhajiyaa laga bilaabo **8/1/22** ilaa **8/18/22** si dadweynaha uga faalodaan. Waxaa la dhiirigelinaa in faalo laga bixiyo iyo in lagu soo gudbiyo emailka mohcomments@boston.gov

Marka la gaaro dhamaadka muddada faalada, MOH waxay qorshaha u diri doontaa HUD si ay u fiiriso una ogolaato. Draaftigaan Qorshaha HOME-ARP waxaa lagu soo dhajinaa bogga internetka Xafiiska Dhageysiga iyo Faalada Dadweynaha ee Duqa Magaalada (Mayor's Office of Housing's [Hearing and Public Comment webpage](#)).